

GURIGAYGA

DABAQA AH

HAGAHA DEGANAYAASHA



JAWIGA FINLAND IYO DHISMAYAASHOODA

Finland waxay leedahay afar xilli oo kala ah gu, xagaa, deyr iyo jiilaal. Roobabkana waxay u da, aan si isku dheelitiran, laakiin heerkulka ayaa is bedbedela in badan waqtiyada kala duduwan ee sanadka.

Guryaha qaab dhismoodkooda iyo farsamooda waxaa si weyn looga taxaderay in guriga uu noqdo mid lagu raaxeysto sanadkoo idil, gurigu waa inuu ku siiyo badbaado isla markaana uu kaa ilaaliyo qabowga, dabeysha iyo roobka.

Deganuhu waa inuu ogaadaa sida saxda ah uu u dhowri lahaa guriga.

**BULSHADA FINISHKA AH
BARKEED WAXAY DEGAN
YIHIIN GURYAHA DABAQYADA
AH KUWAAS OO LEH QAAB
NOLOLEED WANAAGSAN
OO AMAAN LEH.
KUSOO DHAWOW
KOOXDEENA!**



Helsingin kaupunki



Lähiöprojekti
Helsinki

ISTICMAALKA GURIGA...



Hadii ay dhacdo in gurigaaga ay **biyo ku furmaan** wargeli arintaas sida ugu dhaqsaha badan.

1 NIDAAMKA DIIRINTA GURIGA

Qolalka guriga diirimaadkooda waxa uu uga imaanayaa hiitarada.

Hiitarada diirimaadkooda waxaa lagu qiyaasaan ama lagu hagaajiyaa xarunta diirimaadyada iyadoo la eegaayo hadba jawiga banaanka ka jira.

Hiitarkasta waxa uu leeyahay mitircabira heerkulka guriga ama meel laga rajiistareeyo.

Waxay rajiistareeyaan heerkulka hiitarka si heerkulka guriga uu unoqdo mid aad loo jecleysto.

2 HEERKULKA GURIGA IYO QOYAANKA

Heerkulka guriga waa inuu ahaadaa marwalba mid isku dheelitiran.

Heerkulka qolkana waa inuu ahaadaa 20-20 °C.

heerkulka qolka waa inuusan ka hoos marin 18 °C ama ka kor marin 24 °C.

Hawada guriga qoyaankeeda waa in aan kor looqaadin ilaa ay daaqadaha ka huuraan.

Guryaha waxaa laysku dayaa in loo dhiso si diirimaadkoodu ay ugu baxdo wax yar oo tamar ah.

Sidaa darteed guriga saqafkiisa sare iyo darbiyada waxay yihiin kuwo si fiican u xajiya kulka daaqadahana waa kuwo leh dhowr muraayadood.

Markay tamarta kaydsanto qarashka ku baxa tamarta wuxuu noqonaayaa mid yar. Haddii guriga uu yahay mid qabow la xiriir shirkada guryaha qeybteeda dayactirka.

3 HIITARADA

Haku daboolin hiitarada tusaale: Daahyada,

Waa in aadan dhigin hiitarka hortisa kuraasta

fadhiga ama alaabada guriga kuwaas oo idil waxay ka celinayaan in uu kuleylku guriga oo dhan gaaro.

4 Kahortaga waxyeelada qoyaanka

Waxyeelada qoyaanka waxaa keeni kara tubooyinka iyo makiinadaha guriga kuwa biyaha lagu isticmaala oo biyo daadiya. Sidaa darteed waxaa muhiim ah in marmarka qaarkood aad fiiriso in makiinaduhu aysan dhulka biyo ku daadineynin.

Qaboojiyaha, barafeyaha iyo makiinada alaabta waa in la hoos dhigaa caag ka ilaaliya biyaha dhulka. Waxaa laga soo iibsadaa isla meesha aad makiinada ka soo iibsatay isla markaana halmar ayaa la wada xiraa. Makiinada alaabta iskaa u ma xeran kartid, shaqadaas waa in loo dalbaa oo qaban kara kaliya qof xirfad u leh ama shirkada xirta.



Markasta oo aadan isticmaalaynin makiinada alaabta iyo tan dharka waa inaad ka xertaa tubada biyaha ay ka qaataan. Marnaba haka tagin makiinada dharka dhaqdo iyo tan alaabta dhaqdo oo shidan markaad ka tagayso guriga.

5 Qalabka biyaha

Hadii tubada biyaha ama godka musqusha ay daadiyaan biyo waa in la hagaajiyaa. Waxyar oo biyo daadasho ah waxay si deg deg ah kor ugu qaadaysaa qarashka biyaha. Wargeli biyo daadashada isla markiiba shirkada guriga qeybteeda dayactirka.



6 Shabakada tubiooyinka biyaha

Tubooyinka biyaha waxay guriga u keenaan biyaha kulul iyo kuwa qabow iyagoo ka keenaayo xarunta biyaha looga qeybiyo degmada. Biyahan waa kuwo lacabi karo. Haddii tubada biyaha ay keeneynin biyo kulul la xiriir shirkada guriga qeybteeda dayactirka.


7 A) Biyaha wasaqda ah

Biyaha wasaqda ah iyo kuwa musqulaha waxa ay maraan tubooyinka bullaacadaha waxaana tagaan xarunta biyo nadiifinta. Godka musqusha waxaad ku ridi kartaa oo kaliya warqada musqusha. Ha ku ridin haraaga cuntada godka musqusha. Tubooyinka kuma shubi kartid saliida cuntada ama dufinka. Waxay keenayaan in tubada bulaacada ay xeranto.



7 B) Qashinka

Qashinka waxaa lagu kala soocaa guriga adigoo ku ridaaya weelasha loogu tala galay. Waxaadna ku shubaysaa qashinka guriga meeshiisa loogu tala galay in qashinka lagu tuuro. Ahow mid feejigan markaad kala soo caysid qashinka, inaad ku ridid qashinka meesha saxda ah ee loogu talagalay.



JIILAAL
-30 °C

XAGAA
+30 °C

+18 °C - +24 °C

8 Daaqadaha

Heerkulka guriga 2

Sistamka anteenada 12

Hiitarada 3

12

4 kahortaga waxyeelada qoyaanku uu keeni karo

5 Qalabka biyaha

Qashinka 7 B

7 B

6 Tubiyooyinka biyaha

9

7 A

9

11 Saunada iyo qolka qubayska

1 Nidaamka kuleelinta guriga

10 Meesha dharka lagu dhaqo

9

11


ARTO FORSELL 2012

8 Daaqadaha

Daaqadaha waxay guriga siiyaan iftiin. Hawa bixinta darteed daaqadaha waxay leeyihiin daaqado yar yar oo loogu tala galay inay hawada ka baxdo, waqti yar si xoog leh uga aaryey guriga daaqada qaas ahaan xilliga qaboobaha. Haka tegin guriga daaqadoo furan! Biyaha roobka ayaa laga yaabaa inay ka soo galaan oo ay waxyeelleeyaan daaqada, darbiga iyo dhulka.

Agagaarka daaqada waxaa laga dareemayaa waqtiga qaboobaha qabow iyo hawo. Sidaas daraadeed hiitarka waxaa lagu dhejiyay daaqada hoosteeda. Hawada kulul waxay u ka caysaa kor daaqada horteeda waxayna yareyneysaa dareenka dabeysha qabow.


Daaqadaha waxay leeyihiin goomo kuwaa soo ka celinaaya in ay hawada qabow soo gasho guriga gudahiisa. Si kastaba ha ahaatee haddii daaqada halka ay ka furanto ay ka soo gasho hawada qabow la xiriir shirkada guryaha. Haddii ay daaqada uumi yeelato, ama barafowdo la xiriir shirkada guryaha.



9 Dhar qalajinta

Musqusha qubayska waxaa lagu qalajin karaa inyar oo dhar ah oo kaliya. Qolalka kale guriga laguma qalajin karo dharka, sidaa darteed qoyaanku wuxuu isugu soo u rurayaa tusaale, muraayadaha daaqadaha asagoo ku noqonaya uumi wuxuuna waxyeelaynayaa dhismaha.

Balagoonka waad ku qalajinkartaa dharka ayadoon laga arkeynin banaanka. Guriga meeshiisa dharka lagu qalajiyo ayaa ah meesha ugu wanaagsan ee lagu qalajiyo dharka.



10 Meesha dharka lagu dhaqo

Guriga meeshiisa dharka lagu dhaqo waxaad ku dhaqan kartaa dhar badan, waxaadna ku qalajinkartaa makiinada qalajisada ah ama qolka dharka lagu qalajiyo.



11 Saunada iyo musqusha qubayska


Saunada guriga iyo musqusha qubayska uma aaryeenkartid qolalka xagooda adigoo u furaaya albaabka. Saunada iyo qolka qubayska waxa ay leeyihiin hawo saare, halkaas oo ay qoyaanka iyo uumiga ka baxaan. Sawirkan waa saunada shirkada guryaha.

12 Nidaamka anteenada

Shirkada guriga waxay leedahay anteenada guud ama waxay ka tirsan tahay shabakada Networka. Anteenada dheeri ah ama saxanka (diishka) laguma dhejinkaro fasax la, aan. Fasax waa innad weydiisataa Mas'uulka guryaha.

Haddii uu dhaco qalad ama wax jabaan

Haddii ay dhacdo in makiinad ama qalab uu gurigu leeyahay qalad kaaga jabaan (tussale, albaabka, godka musqusha, sagxada dhulka, hawosaraha) Wargeli mas'uulka guryaha qofka dayactiraha ah.



Maashiinka hawada qaboojiya

A) Mashiiin hawada saara

Hawada cusub waxay guriga uga timaadaa daaqaadaha ama darbiga banaanka hawosaarihiisa. ①

Hawada waxa ay ka baxdaa kushiinka, musqusha qubeyska iyo hawo bixiyaha kuyaala qolka dharka. ②


Mashiinka hawada saara.

B) Mashiiinka hawada keena iyo kan saara


hawada cusub waxay guriga ka soo gashaa kanaalka hawada iyadoo soomareyso hawasaaraha. ③

Hawada waxay ka baxdaa hawosaaraha. ② hawada waxay martaa gurigoo dhan waxaana loo rajiistareeyaa ama loo hagaajiyaa si mashiiin ahaan ah.

Ha daboolin meesha hawada ay ka soo gasho ama ay ka baxdo. Nadiifi hawosaaraha qiyaastii laba jeer sanadkii: ku tirtir maro qoyan si aysan u badelmin rajiistaraha. Haddii hawo saaraha ay ka soo gasho hawo cusub ama qaaca cuntada ee guriga kugu dhagan la xiriir shirkada guriga. Hawo badalka ayaa markaas ciladaysan.



Meesha hawada ay ka soo gasho



Meesha hawada ay ka baxdo

Kushiinka iyo cunto diyaarinta

Cuntada waxaa lagu diyaarinkaraa oo kaliya kushiinka. Balakoonka waa ka mamnuuc in wax lagu dubo! Markaad bilaabay sid inaad diyaariso cuntada shid hawasaaraha makiinada cuntada lagu karsado korkeeda **4** ku yaala. Uumiga ka dhasha marka cuntada la karinaayo ayaa halkaas ka baxaaya.

Sawirkan makiinadda waxay leedahay filter, kaas u diida in dufanku ku ururo hawo saaraha.

Dabka uu dufanku dhaliyo waa halis!

Filtarka wasaqda waa in la dhaqo ama lagu bedelo mid cusub. Isla markaana waa in la nadiifiyo daboolka makiinadda cuntada kariso. Samee sidan 3.dii biloodba mar. War bixin dheeraad ah weydii dayactiraha shirkadda guriga.

Haddii guriga uu leeyahay makiinada cuntada lagu kariyo oo ku shaqeysa gaaska baro sida loo isticmaalo una daryeel si taxadar leh warbixin dheeraad ah hadaad u baahan tahay waxaad ka helayaas mas'uulka guriga.

BUSTAHA DABKA LAGU DAMIYO

Kataxadar in kushiinka meel fiican oo si sahal ah lagu heli karo uu yaalo bustaha dabka lagu damiyo laguna dhejiyay darbiga. Isticmaal bustaha markaad dabka bakhtiineysid (caburin).

XASSUSO: Inaad waligaa biyo ku daminin gubashada dufinka! Ku dami gubashada dufanka adigoo caburinaaya.



Badbaadinta dabka waa arin qofkasta khuseysa

Sharciga ayaa amraaya in guriga uu lahaado ugu yaraan hal xabo oo ah digniin bixiyaha dabka. Guryaha waa weyn waa inay lahaadaan digniinbixiyayaal badan. Digniin bixiyaha dabka waa uu qeylinaayaaa marka qolalka ay gubanaayaan ama ay qiiqaayaan. Si joogto ah u xaqiiji in digniin bixiyaha dabka inuu shaqeynaayo. Ka bedel digniin bixiyaha bateriga haddii loo baahdo.




Ogeysiis: Digniin bixiyaha ma u wacaayo qolada dabdamiska inay meesha yimaadaan.

Waa inaad adiga sameysaa! Wac 112

Sidan ayaad uga hortagi kartaa dabka

- Ha is ticmaalin makiinadaha dabka ku shaqeeya oo tayadoodu xun tahay ama fiilooyinka sii inuu qofka xirfada u leh dayactiraa.
- Ha isku dayin inaad adiga nafsadaada aad udayactirtid makiinada cuntada lagu kariyo ama makiinadaha kale ee korantada ku shaqeeya laxiriir oo kaliya shirkada dayactirta ama dukamada lagu sameeyo.
- Haku daboolin dhar hiitarada korantada ah ama kuleylisada..
- Haku qalajinin dharka hiitarada korkiisa ama dhagaxyada saunada korkooda
- Soo gado iftiimiye ama ileys bixiye ku haboon nalka, iftiin bixiyaha waa lagu calaamadeeyay quwada nalka uu noqonkaro.
- Dami makiinadaha korontada ku shaqeeya isla markiiba, isticmaalka kadib.
- U baney taleefishanka, mikrowga, qaboojiyaha ja baraf dhaliyaha meel ay hawo kaqaataan. Kuwaani lama dabooli karo! haka celinin in hawada ay ku dulwareegto mashiinadaas agagaarkoda
- Ha ku keydinin dareerayaasha sida sahalka ah u gubta maqaasiinada guud. Guriga waxaa lagu keydin karaa in yar. Dareerayaasha gubtana waxay yihiin xitaa saliida cuntada.

Xassuuso: korontada markey gubato inaad ku damiso si caburin ah, bustaha dabka lagu damiyo ama dab damiyaha! **Ha is ticmaalin biyo!**



Sidan ayaad u dhaqaalaysan kartaa tamarta

- Bedel nalalka guluubyada ah kuna bedel kuwa tamarta kaydiya
- Si fiican oo degdeg ah u hawo sii
- Ka jar dabka raadiyaha, taleefishinka iyo kumbiyuutarka isticmaalka ka dib xitaa adoon ku reebin wax daba.



Shaqooyinka wax bedelka

Shaqooyin wax lagu badalo Guriga lagama sameenkaro wax shaqo ah oo waxlooga badelayo fasax la,aan. Shaqooyinka wax lagu bedelayo waa inaad kala hishiisaa mas'uulka guruga ama mulkiilahaguriga. Badalka waxaa kaloo loo baahan karaa fasax dhismo oo dowli ah. Sidaan ayaa loo ilaaliyaa inuu dhismuhu noqdo mid amaan ah oo caafimaad leh. guryaha kirada ah shaqada wax badalkooda Waxeey leedahay nidaam la raaco oo waadax ah kaasoo aad kaheli kartid mas'uulka guriga.

Nidaamka xeerarka guriga

Guri kastaa wuxuu leeyahay nidaam iyo xeerar. Ku waa soo ay tahay in lagu dhaqmo si ay u dhoorsanaato hishiiska darisnimada.

Xasuuso inaad ku waan adiga sameesatid

- Nadiifi ama badel makiinada cuntada filtarka hawosaaraheeda 3.dii bilood mar.
- Nadiifi filtarka hawo bedelaha laba jeer sanadkii.
- Nadiifi biyo mareenka iyo urxerayaasha iyo godadka dhulka ay biyuhu maraan markaad nadaafada ku jirtid.
- Bedel digniin bixiyah dabka baterigiisa si waafaqsan nidaamka Tusa. sannadkii halmar.
- Dhalaali oo nadiifi baraf dhaliyaha sanadkii hal mar Tusa. xiliga qaboobaha iyo xagaaga kala barkiisa markuu eber noqonaayo.

Xaalada deg dega ah

Waxyeelada biyaha

1. Isku day inaad ka xerto tubada biyaha meesha laga xero
2. Wac isla markaana shirkada biyaha nambarkooda heeganka ah ama
3. wac nambarka heeganka ah ee dukaanka tubooyinka biyaha

Ku qoro xasuus qorkaaga shirkada iyo mas'uulkaguriga nambarkooda heeganka ah.



ASUMISOPAS maahanmuuttajille 2013,
HELSINGIN KAUPUNKI / Lähiöprojekti;
Somalian kielen käännös tulkki/kääntäjä
Mohamed Omar Hilowie;
Axovaatio Oy/Teuvo Aro;
Mainostoimisto Arto Forsell Oy

**Dab ama halis kale haddii ay dhacdo
wac nambarka degdega ah**

112